


Republika Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimada



Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office

Go'aan Lr: 333 /2024.

Date: 4th March 2024.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa ^{4th} March 2024, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane (C/kariim Axmed Mooge), kuna saabsanayd Tirtirid/Cancelid Mulkiyad TR-lambarkeedu yahay 2323, Dood & falan-qayn dheer ka dib.

Markay Arkeen

Guddida Fulintu:-

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019.

Markay Arkeen

Warqadda Maxkamada ee ay sumadeedu tahay **MGH/DFL/72/2018**, kuna taariikhaysan **12/08/2020**, ujeedadeeduna tahay Amar Baabin File Lr: 56540 ee uu ku qoran yahay Qoraysh Cabdi Faarax iyo u samayn sharci loo fuliye Sucaad C/laahi Mumin, kana soo baxday Maxkamada Gobolka M/Jeex.

Markay Oggaadeen

Warbixinta tixraaceedu yahay **DH/AGDHDHH/184/2024**, kuna taariikhaysan **24/02/2024**, ujeedadeeduna warbixin, kana soo baxday Xafiiska Agaasimaha Waaxda Dhulka ee Dawladda Hoose ee Hargeysa.

Markay Xaqiiqsadeen

Warbixinta Sumadeedu tahay **XDHH/XSH/0035/2023**, kuna taariikhaysan **09/09/2023**, ujeedadeeduna tahay Tallo Soo Jeedin Fulin Amar Baabin Fayl, kana soo baxday Xafiiska Shuruucda DHH, warbixintan oo tilmaamaysa in muwaadinada loo fuliyay dhulkan loo sameeyo mulkiyad, isla markaana la tirtiro mulkiyadii hore ee uu ku qorna laga fuliyuhu, maadama laga xukuntay.

Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadeen :-

Ka dib markey arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Gudida Fulintu waxa ay Go'aansadeen in la Tirtiro/cancel gareeyo Faylka iyo Mulkiyadda TR-Lambarkeedu yahay 2323, cabirkeeduna dhan yahay **18X24m**, kuna yaala Degmada **I/Koodbuur**, dhulkan oo ay Maxkamada Gobolka M/Jeex u Xukuntay Muwaadinad **Sucaad C/laahi Muumin**, iyada oo loo samayn doono muwaadinadan fayl iyo mulkiyad cusub oo magaceedu ku qoran yahay.

Mahad

leh.

(Siciid Nuur Jamaac).
Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.

(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur')
Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa.

(C/kariim Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi
Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.

Email: MayorOffice2021@gmail.com, Somaliland.

**Republika Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimada**



**Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office**

Go'aan Lr: 353 /2024.

Date: 4th March 2024.

Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa ^{4th} March 2024, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargeysa Mudane (C/kariim Axmed Mooge), kuna saabsanayd Tirtirid/Cancelid Mulkiyad TR-lambarkeedu yahay **2323**, Dood & falan-qayn dheer ka dib.

Guddida Fulintu:-

Markay Arkeen

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019.

Markay Arkeen

Warqadda Maxkamada ee ay sumadeedu tahay **MGH/DFL/72/2018**, kuna taariikhaysan **12/08/2020**, ujeedadeeduna tahay Amar Baabin File Lr: 56540 ee uu ku qoran yahay Qoraysh Cabdi Faarax iyo u samayn sharci loo fuliye Sucaad C/laahi Mumin, kana soo baxday Maxkamada Gobolka M/Jeex.

Markay Oggaadeen

Warbixinta tixraaceedu yahay **DH/AGDHDHH/184/2024**, kuna taariikhaysan **24/02/2024**, ujeedadeeduna warbixin, kana soo baxday Xafiiska Agaasimaha Waaxda Dhulka ee Dawladda Hoose ee Hargeysa.

Markay Xaqiiqsadeen

Warbixinta Sumadeedu tahay **XDHH/XSH/0035/2023**, kuna taariikhaysan **09/09/2023**, ujeedadeeduna tahay Tallo Soo Jeedin Fulin Amar Baabin Fayl, kana soo baxday Xafiiska Shuruucda DHH, warbixintan oo tilmaamaysa in muwaadinada loo fuliyay dhulkan loo sameeyo mulkiyad, isla markaana la tirtiro mulkiyadii hore ee uu ku qorna laga fuliyuhu, maadama laga xukuntay.

Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadeen :-

Ka dib markey arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Gudida Fulintu waxa ay Go'aansadeen in la Tirtiro/cancel gareeyo Faylka iyo Mulkiyadda TR-Lambarkeedu yahay **2323**, cabirkeeduna dhan yahay **18X24m**, kuna yaala Degmada **I/Koodbuur**, dhulkan oo ay Maxkamada Gobolka M/Jeex u Xukuntay Muwaadinad **Sucaad C/laahi Muumin**, iyada oo loo samayn doono muwaadinadan fayl iyo mulkiyad cusub oo magaceedu ku qoran yahay.

(Siciid Nuur Jamaac).
Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.

Mahad

leh.

(Khadar Axmed Cumar Khadar Nuur).
Ku xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa

(C/kariim Axmed Mooge).
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi
Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_/2024

Date: 04/2/2024

Ku:Agaasimaha waaxda dhulka D.H.H

Uj: war-bixin Dhul

Agaasime

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa warbixin ku saabsan dhulka leh **TR; 2323** kaaso aad ifartay in aan ka soo warbixiyo cabirkiisa iyo jihooyika **TR; 2323**.

Hadaba agaasime goobtani waa **24x18m**, w/g=waddo, K/B=dhisme, waxaana ka dhisan **Sandaqad**, waxaanay ka mid tahay beerta **ILMA SAGAX** ee degmada **I/K/Buur**.

ALLA MAHADLE

ENG; Xuseen Maxamed Cumar (x,case).....

Caran Guur
Followed Report
- Guided Assessment
- Hunt the
- find in
Followed
Request
Alh
20/2/2024

02/02/2024

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/- 184/2024.

Date: -24/02/2024

KU: Duqa Caasimda Jsl
OG: Xoghayaha dawlada hoose
OG: K/Xigeenka Duqa Caasimada

=Hargeysa=
=Hargeysa=
=Hargeysa=

Ujeedo: Tirtirid fayl (TR; 2323)

Mudane

Tixraac warqada sumadeedu tahay Ref/ XDHH/XSH/0035/2023 Iyo qoraalka amarkaga ku taarikhaysan 11/09/2023

Hubin kadib faylkani ma leh wax document ah kaliya aan ahayn warqada nootayada ee iibka, iyo waraaqihii ka soo baxay maxkamada degmada waxaana ku cad in la tirtiro faylka

Intas kadib dhulkan cabirkiisu dhanyhay 24x18m waxaa ka dhisan sandaqad, waxaanay ka midtahay beerta Ilma Sagax ee degmada I/K/Buur.

Sidaas darteed maayer waa in la tirtiraa TR; 2323 loona fuliyaa muwaadinada ay maxkamadu usoo amartay in loo sameeyo sharci.

Alleh mahad leh

Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimaha Waaxda Dhulka

Email: MohamedYusuf@dhhgov.org Hargeisa



Ku: Hargeisa
u samee foomo - 4
Iyo bixineeyo

02/03/2024

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_/2024

Date: 04/2/2024

Ku:Agaasimaha waaxda dhulka D.H.H

Uj: war-bixin Dhul

Agaasime

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa warbixin ku saabsan dhulka leh **TR; 2323** kaaso aad ifartay in aan ka soo warbixiyo cabirkiisa iyo jihooyika **TR; 2323**.


Hadaba agaasime goobtani waa **24x18m**, w/g=waddo, K/B=dhisme, waxaana ka dhisan **Sandaqad**, waxaanay ka mid tahay beerta **ILMA SAGAX** ee degmada **I/K/Buur**.

ALLA MAHADLE

ENG; Xuseen Maxamed Cumar (x,case).....

Cover Letter
- Technical Report
- Guided Aggagad
- Hunt Area
- Just in case
- Technical
- Request
Alh
20th 2.2024

04/03/2024



WAAXDA HANTI DHAWRKA GUDAHA

Ref: DHH/WHDHG/ 22 /2024

Date 16th Jan 2024

Ku: - Agaasimha Dhulka D/Hoose

= Xarunta=

Og: - Duqa Caasimada

= Xarunta=

Og: - Xoghayha Fulinta D/Hoose

=Xarunta=

Og: - Ku Xigeenka Duqa Casimada

=Xarunta=

Uj: - File Tirtirid

Mudane agaasime

Tixraaca amarada ku qoran jaldiga dushiisa ee jeedadooduna ay yihiin fadlan ka soo warbixiya file- kan sida loo tirtirayo. Mudane agaasime waxa jirta in file-kan aanu lahayn waxa Documenta kaliya aan ka aheyn warqad Nootayada ee libka. Waxa kale oo la socda waraaqihii ka soo baxay **Maxakamada Degmada** kuwaas oo ku cad in la tirtiro File numberka **56540** loona sameeyey Tr-ka **2323**. Inta ka dib Xafiiska Shuruucda ee **D.H.H** waxa ay ku soo lifaaqeen warbixin ku cad in loo fuliyo muwaadinka maxakamadu u soo fulisay magaceeduna uu yahay Sucaad Allaahi Muunin.

Sidaas darteed mudane agaasime Waa in la tirtiraa dhamaan Tr. Numberka sare ku soo xusay e ah (Tr.No(2323).

Allaa Mahad Leh

Abdillaahi Mahdi Jamac
Agg, Waaxda Hanti Dhawrka Gudaha



Beerte i/me
Sagax.

Cabbir 24x18
G/W= weddo



Xafiiska Shuruucda

Ref: XDHH/XSH/0035/2023.

Date: 09/09/2023

=Xarunta=

KU: Maayirka Caasimada Hargeysa

**Ujedo: Tallo Soojeedin Fulin Amar Baabin File Lr: 56540 Iyo U Samayn
Sharci Loo Fuliye Sucaad C/Laahi Muumin.**

Mudane Maayir

Mudane Maayir anaga oo ka jawaabayna Amar aad noo soo qortay ee ku taariikhaysan 08/08/2023 kana soo baxay Maxkamada oo ay sidato muwaadinada **SUCAAD C/LAAHI MUUMIN** taas oo ah Gabadh muwaadinada ah oo rabta in loo fuliye loogu sameeyo fayl sharciya, waxaanu soo jeedineynaa tallada Sharci ee aanu ku soo gunaanadney talladayada Xafiiska Sharciga

Markaanu aragnay: Tixraaca warqada sumadeedu tahay **MGH/DFL/72/2018** kuna taariikhaysan **12/08/2020** ujeedaduna ahayd Amar Baabin file **Lr: 56540**

Markaanu aragnay: Tixraaca warqada sumadeedu tahay **MGH/DFL/72/2018** kuna taariikhaysan **14/09/2014** ujeedaduna ahayd amar xoog fulineed oo lagu wareejinaayo dhulka.

Markaanu aragnay: Tixraaca warqada sumadeedu tahay **NMJ606/012** kuna taariikhaysan **05/09/2012** ujeedadeeduna ahayd Heshiis Iib Dhul kana soo baxaday Nootaayada Miisan public Notary.

Markaanu Hubiney: In ay Dhulkan Faylka loogu samaynaayo gacanta ku hayaan, kuna tasarufayaan ilaa iyo Markii laga fuliye, dhinaca Sharciga usamaystay oo iyaga laftooda cidii marka hore ka libsay ay umagdhawday dhulkan laga fuliye.



Ku: Sh. Shurub

*Hubin ka dib soo process garac
sidi: foyaka - ka tinnu lahe*

11/09/2023

*Shurub
Faylka iyo
ka kuma jiro*

*To: Arkiyade
Faallan soo huf
T. k. kasi nahu.
ayiro systemko
09/12/2023*



Xafiiska Shuruucda

Markaanu xog waraysi la yeelanay dhinaca laga fuliyahaya filekan waxa uu noo xaqiijiyeye in laga fuliyeyey dhulkan iyagana cidii ka iibisay ay u maga dhawday oo hada uu socodo process iygana sharciga loogu samaynayey wixii loogu magdhaway oo aha guri .

Sidaas darted mudane maayir waxaanu ku talinaynaa in la fuliyo xukunkan maxkamada maadama dadka laga fulinayo file iyagana loo fuliyey guri ay magdhaw u siiyeen dadkii beerta lahaa ee laba iibka sameeyey ugu danbayn waxaanu ku talinaynaa in la tirtiro TR. Number ka baxay dhulkan oo numberkiisu yahay Tr. 2323 sharcina loogu samaeeyo dhaxlayaasha **Sucaad c/laahi Muumin**

Magaca iyo saxeexa Xubnaha Garyaqaanada

1 . Garyaqaan siciid Nuux Cabdilaahi (Madaxa Xafiiska Shuruucda) _____

2 . Garyaqaan Xuseen Axmed Caydiid _____

3 . Garyaqaan Axmed Maxamed faarax (Dayax) _____

4 . Garyaqaan Siciid Cabdilaahi Maxamed _____

5 . Garyaqaan Maxamed Cabdilaahi (Geel-jire) _____



JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX / REGIONAL COURT M-JEEX

XAFIISKA GARSOORAH

MGH/DFL/72/2018

12/08/2020

Ku:- Duqa Caasimada Hargaysa
Og:- Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose...
Og:- Guddomiya Degmada I/Koodbuur
Og:- Loofuliye :-Sucaad C/laahi Muumin
Og:- Lagufuliyeyaal:-1. Mukhtar Ismaacil Axmed
2-Khadar Ismaacil Axmed

=Hargaysa=

=Hargaysa=

=Hargaysa=

=Hargaysa=

=Hargaysa=

=Hargaysa=

Ujeedo :- Amar Baabin File Lr: 56540 ee uu ku Qoran
yahay Qorash Cabdi Faarax iyo
U samayn Sharci Loo Fuliyee Sucaad C/laahi Muumin

Maxkamada Gobolka M/jeex Hargeysa:-

Markay Aragtey:-

Gal dacwadeedka Fulinta ah ee sumadiisa iyo dhinacyadiisuba sare ku xusan yihiin.

Markay Aragtay:-

Digniinta Sumadeedu tahay MDH/DFL/72/2018 bee ku taariikhaysan 09/01/2019. Ujeedadeeduna ahayd Digniin Fulineed oo 10 Cisho ah.

Markay Aragtay :-

Cusboonaysiin Amar Xoog Fulineed ee kasoo Baxday Maxkamada Gobolka M/jeex Hargaysa ee sumadiisu tahey MGH/DFL/72/2018 kuna taariikhaysan 05/03/2020.

Markay Ogaatay:

In Fulintan Xooga Fulineed ah la Fuliyay oo ay Fuliyeen Dhamaan Haayadii ku Shaqada lahaa Si Nabad ahna ku Dhamaatay Fulintan, Loo Fuliyuhuna Degan yahay Dhulkii Loo Fuliyaya laguna Wareejiyay Dhulka Cabirkiisu yahay 18X24Mt

Markay Aragtay:-

Codsiga ee ku taariikhaysan 06/08/2019 ee Ujeedadiisuna tahay Codsii ku saabsan Codsii Sharci in laygu Sameeyo Dhulkii la ii Fuliyaha ee ku yaalay Degmada IK/Koodbuur Xaafada Caro Kaabada Cabirkiisuna yahay 18X24Mt ee Maxkamada usoo gudbiyey Loo Fuliyaha sare ku xusani.

Ku: Xafiiska Shuruucda

Ko soo eelo bixiya

08/09/2023

Markay Aragtay:-

Asbaabta sare ku xusan iyo Qodobada
343,338,272,285,346,350,429,XHM. Sidaa daraadeed waxay
soo saartay Amarkan:-

Amarka Maxkamada.

1. Maxkamada Gobolka M/Jeex, Waxay Idinku Amraysaa in aad Baabiisaan File Lr: - 56540 kuna Qoran yahay Qoraysh Cabdi Faarax.
2. Maxkamada Gobolka M/Jeex, Waxay Idinku Amraysaa in aad u Samaysaan Faylkii Sharciga Dhulka Cabirkiisu Yahay **18X24Mt** ee ku yaalay Degmada IK/Koodbuur Xaafada Caro Kaabada Jihooyinkiisuna Kala Yihiin Sidan:-

- Bari = Dhisme
- Galbeed = waddo
- Waqooyi = Waddo
- Koonfur = Dhisme

Maadaama Fulintan Dhamaatay loona fuliyaya Loo Fuliyaha
Sucaad C/laahi Muumin.

3. Amarkani Waxa Uu Soo Baxay maanta oo Taarikhdu Tahay
12/08/2020

Wabilaahi Tawfiiq

Sidaas Iyo Wada Shaqayn Wacan

(**Xasan Axmed Nuur**)

GARSOORAHA MAXKAMADA GEBOLKA M/JEEX
=HAR GAYSAN

C/qaadir Muxumed Xuseen _____
Kaaliyaha Maxkamada Gobolka M/Jeex